

## **Shahaadada koroona ee Ingiriiska iyo Wales ayaa la oggolaanayaa laba billaabo 12-ka ogoosto**

**Laba billaabo 12-ka ogoosto saacaddu marka ay tahay 15.00 waxay Norway aqbali doontaa shahaadada koroona ee Ingiriiska iyo Wales. Laga billaabo isla taariikhdaas xadka ayaa lagu xaqiijin doonaa QR-ka shahaadada koroona ee NHS.**

Taas oo ka dhigan in dadka ka yimid Ingiriiska iyo Wales ee laba cirbadood ka qaatay tallaallada ay aqoonsatay hay'adda daawada ee Yurub EMA in ay Norway si xor ah u soo geli karaan. Waxaa sidaas oo kale ah kuwa uu cudurka koroonuhu ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay. Waa laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda waddanka, uma baahna in ay wataan caddaynta in cudurka laga baaray oo laga waayay, uma baahna in ay buuxiyaan foomka diiwaangelinta soo gelidda waddanka iyo in xadka tijaabo looga qaado midna.

– Waxaan ku faraxsannahay in aan hadda xalkaan gaarnay. Dad badan oo dalalkaan ku nool ayaa xiriir soke la leh Norway, waxaana hadda u fududaanaysa in ay halkaan yimaadaan ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Dadka ka soo safray Ingiriiska iyo Wales ee wata shahaado koroone oo shaqaynaysa ee hadda ku jira hoteellada karantiilka ee Norway way ka bixi karaan hoteelka marka uu nidaamku khamiista dhaqan galo.

Norway ma xaqiijin karto shahaadada koroona ee warqadda ah maaddaama aysan lahayn QR. Haddii shahaadada warqadda ah ee NHS (National Health Service) loo sameeyo QR la xaqiijin karo, markaas waa laga aqbali doonaa Norway.

Waxaa la filayaa in Waqooyiga Ayrland iyo Iskotland ay ayugana mustaqbalka dhow yeeshaan shahaado koroone oo la mid ah shahaadada koroona ee NHS. Waxay markaas Norway samayn doontaa nidaam suuragelinaya in kuwaas Norway lagu xaqiijin karo.

Tallaalka Novavax ayaa Ingiriiska dadka lagu tijaabiyaa, dadka qaatana waxay xaq u leeyihiin in la siiyo shaahada koroona ee NHS. Agaasinka caafimaadku wuxuu ku taliyay in aqbalidda Novavax dib loo dhigo ilaa iyo inta EMA ka aqoonsanayso. Taas oo ka dhigan in dadka qaatay tallaalka Novavax ee tijaabada ah in ay qaban doonaan xayiraadihii soo gelidda waddanka ee caadiga ahaa ee khuseeyay dadka aan tallaalka buuxa qaadan ama covid-19 ku dhicin lixdii bilood ee u danbeeyay.